



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR SAXAFADDEED 028/2009**

#### **Ergaygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud oo furay Shirkii Guddigga wadajirka ee Arrimmaha Nabadgelyada**

Nayroobi, 12 Oktobar 2009 - Waa in madaxda Soomaaliyeed ay sii wadaan goaankooda ku aadan wadalada iyo isla shaqeynta si loo helo nabad iyo xasilooni, ayuu ku yiri Ergaygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Arrimmaha Soomaaliya, Ahmedou Ould-Abdallah, ka qeybgalayaasha Shirka Sedaxaad ee Guddiga Wadajirka Arrimmaha Nabadgelyada, shirkaas oo maanta ka dhacay Neyroobi.

“Waa in si fiican loo habeeyo loona xoojiyaa ciidamadda nabadgelyadda. Guulo waaweyn aya la gaaray wixii ka dambeyey isku-daygii afganbigii dhicisoobay ee 7dii May, laakiin hadana waxaa loo baahan yahay in dadaalka la kordhiyo si wax intaa ka badan loo qabto”.

Mudane Ould-Abdallah wuxuu hoosta ka xariiqay baahida loo qabo in la dhiso ciidamo tayo- xirfadeed leh, amni ahaanna aad u habeeyan - ugu danbeynta Bisha August 2011, waqtigaas oo ku aadan wakhtiga uu dhamaanayo xilliga Dawlada ku Meel Gaarka ah.

“Haddii si fiican loo adeegsado, waqtiga aan soo sheegnay waa waqti macquul ah, dibna loo ugu dhisi karo qeybaha ciidamada Soomaaliyeed. Dhamaantaanada waxaan halkaan u joognaa in aan kaalmo geeyano, umana joogno in aan daraasad sameyno ama dib u dhigno wixii kaalmo ah ee nooga soo aadi lahay hawsha sida wadajirka ah ay uwada qabanaayeen Soomaaliyad iyo bulshada caalamka”.

Waxaa kale oo Ergaygga Gaarka ah ku guubaabiyey bulshada caalamka ee ka shaqeyseya Neyroobi in ay diirada saaraan ka shaqeynta arrimmaha muhiimka ah sida

arrimmaha nabadgelyada, kaalmada bini-aadanimu, xaquuqul insaanka, hurumarka, gaar ahaan abuurista shaqooyinka.

Gaba-gabadii, Mudane Ould-Abdallah wuxuu u mahad-celiyey xubnaha guddiga wadajirka ah ee arrimmaha nabadgelyada, madaama ay yihiin dad hawshooda ku dhegan, laakiin wuxuu si gaar ah ugu mahad-celiyey taliyaha Ciidammad AMISOM iyo Ku

xigeenkiisa, kuwaas ku shaqeynaya xaalad aad u qalafsan. “lama helayo hadala lagu cabiri karo geesinimada iyo asluubta ay leeyihiin Ciidammad AMISOM.”

Qodobka 8aad ee Heshiiskii Jabuuti aya lagu dhisay Guddiga Wadajirka Arrimmaha Nabadgelyada, taasoo ujeedada laga leeyahay ay tahay in kor loogu qaado awoodda waxqabad ee Dawladda Soomaaliyeed. Xubnaha guddigaani waxay ka kooban yihiin Saraakiil Sar-sare ee ka socda heyadaha nabadgelyada Dawladda Federalka ku Meel-Gaarka ah ee Soomaaliyeed, Ururka Midowga Afrika, AMISOM, Qarammada Midoobay iyo Xubna kale oo ka socda Bulshada Caalamka sida EU/EC, IGAD, Ururka Jaamacada Carabta, Norway iyo Dalwad Mareykanka.